



James Jeffrey-West oo barre ka ah Madison waxaa loo magacaabay inuu yahay Macallinka Gobolka ee Sanadka

James Jeffrey-West oo macallin ka ah Dugsiga Sarre ee Madison ayaa loo magaacabay Macallinka Gobolka ee Sanadka 2021. Jeffrey-West wuxuu macallin ka yahay sanadkii todobaad Dugsiga Madison isaga oo xirfada macalinimada ku guda jira muddo dhan 22 sanadood, wuxu ku guuleystay abbaalmarinta gobol ee ay bixiyaan Addeegyada Waxbarashada Degmada Multnomah.

Jeffrey-West, wuxuu dhigaa maadadda culuunta bulshada wuxuu ka mid yahay 15 macallin ee ee loo magacaabay inay ku guuleysteen Abbaalmarinta Sanadka Macallinka Oregon. Macallin kale oo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Portland, Mercedes Munoz barrena ka ah Dugsiga Sarre ee Franklin, [waxa ay ku guuleysatay abbaalmarinta guud ahaan gobolka ee sanadka 2020](#). Barnaamijka Macallinka Sanadka ee Oregon waxaa soo bandhiga Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon iyaga oo kaashanaya Bakhtiyaanasiibka Oregon.

Jeffrey-West wuxuu horseed ka ahaa Barashada Akhlaaqiyaadka iyo Cilmi Nafsiyada heerka kuliyadeed ah ee Dugsiga Madison. Wuxuu ka shaqeyey Guddida Kor Joogtada ah Barashada Akhlaaqiyaadka Dugsiyada Dadweynaha Portland, isaga oo haddana ka shaqeynaya Golaha Barashada Akhlaaqiyaadka Gobolka Oregon. Wuxuu kor u qaaday maadadda Cilmi Nafsiyada heerkeedu yahay kulliyada ee Madison hal qaybeed ilaa afar qaybood, taasi oo ka dhigaysa qeyb ugu ballaadhan ee iskuulku bixiyo marka la eego maadooyinka heerkoodu yahay kulliyada(AP).

Maalin kasta iskuulka, waxaa arki Jeffrey-West oo qadaddiisa cunayo xiisadii uu diyaarinayey casharada sababtoo ah wuxuu fasalkiisa ka dhigay meel ay hawlaha ku qabsadaan waqtiga qadadda ardaydu, isaga oo soo martigaliya 10 ilaa 25 arday oo la siiyo cunto fudud(lacagta cuntadaasi waxay ka timaadaa gargaar ahaan), iyada oo lagu qabto kulano lagu baranayo imtixaanada iman doono, iyo imtixaano yaryar oo ciyaarta kahootz. Warqadiisii abbaalmarinta waxaa aad loogu ammaanay sida uu u dhisay kalsoonida iyo xidhiidhka ardayda Dugsiga Madison oo ka kooban bulsho gaar ah. Ugu yaraan 70% ardayda wax ka barataa waxa ay u qalmaan cuntada bilaashka ah ama qiimaheeda hoos loo dhigay iyada oo sidoo kalena ay ardayda dhigataa guryahooda lagago hadlo 35 luqadood.

“Sanadahaasi oo dhan wuxuu ahaa mid ku adag ka go’naanshaha rajooyin aad u sareeyo, waxbarashada meel fiican laga gaaro iyo fursado ay dhammaan ardaydu u siman yihiin,” Adam Skyles, oo ah Maamulaha Dugsiga Madison ayaa ku qoray warqadiisii ku magacaabayey.

“Waxyaabaha uu aad ugu wanaagsan yahay waxaa ka mid ah sidii uu ugu xaqiijin lahaa in ay ardaydu ogaadaan inuu daneynayo isagu qof ahaan.”

Jeffrey-West iyo kuwa kale waxa ay ku guuleysteen abbaalmarin dhan \$500 midkiiba. Waxaa soo magacaabay ardayda, asxaabtooda, maamulka, saaxiibada ama xubnaha qoyska abbaalmarintai iyada oo lagu doortay golaha ay fadhiyaan dadyow kala gedisan oo wakiilo ka ah gobolka. Abbaalmarinta Macallinka Sanadka ee 2021 waxaa la shaacin doonaa xilliga Jiilaalka.